Ku Laabashada Dugsiga 2021: Wararkii iyo Wixii Ugu Dambeeyey

Ogosto 19, 2021

Ardayda,Qoysaska iyo Shaqaalaha Qaaliga ah ee PPS,

Iyada oo aan dhammeystireyno qeybihii Su'aalaha Inta Badan La Isweydiiyo iyo Jawaabahood(FAQ) ee ku laabashada iskuulada, waxaan rabnaa inaan idinla wadaagno dhowr arrimood oo ah waxyaabihii ugu dambeeyey. Ugu horeyn, Hanti-dhowrka Xafiiska Degmada ee Waxqabadka dhawaan waxa ay u soo bandhigeen Golaha Waxbarashada hantidhowrkoodii hubinta caafimaadka iyo nabadgelyada ee gu'gii la soo dhaafay kaasi oo ahaa waxbarashada isku dhafan. Waxaa faraxad noo ah sida aan ugu hanweynahay in aanay jirin wax ka soo baxay baaritaankii ay sameeyeen hantidhowrku. Todoabaadkii la soo dhaafay waxay soo bandhigeen warbixintan:

> *Marka la eego guud ahaan natiijadii ka soo baxday baaritaankii hanti-dhowrka, waxaan ogaanay in dhismayaasha iskuulada, kuwaasi oo ah meeshii ay ardaydu ku qaadanayeen waxbarashadooda fasalada gudahooda intii lagu jiray sanad-dugsiyeedkii 2020-21, waxaa soo baxday inay u hoggaansameen Qorshayaashii Dib u Furista Goobaha Iskuulada. Intaasi waxaa dheer, iyada oo la sii wado cusbooneysiinta tilmaamaha caafimaadka dadweynaha, taasina waxay u muuqataa in dugsiyada degmadu ay abuureen hannaan ay Kooxda Nabadgelyada iyo Caafimaadka gudaha ay ku cusbooneysiinayaan tilmaamo waxtar leh sida ugu degdeg badan loo gaarsiiyo tilmaamaha la cusbooneysiiyey daneeyaasha saameynta ku leh.*
>
> *Waxaan hambalyo u direynaa dhammaan shaqaalaha PPS kuwaasi oo ka shaqeeyey saacado fara badan oo aan la soo koobi karin sidii loo meel marin lahaa habraacyada iyo habnimaadiyaasha nabadgelyada iyo caafimaadka ee lagama maarmaanka u ah dib-u-furista iskuulada waxbarashada isku-dhafan. Warbixinta hantidhowrka ee Nabadgelyada iyo Caafimaadka kaasi oo lagu ogaaday inaysan jirin wax dhibaato ahi ama tallooyin la soo jeediyey waxa ay ka tarjumeysaa shaqadii adkeyd ee aad soo qabateen iyo waliba dadaalkii aad muujiseen.*

Warbixinta hantidowrka oo dhammeystiran waxaad ka heli kartaan marka aad gujisaan halkan.

Mar labaad, waxaan shalay ku dhawaaqnay in lagu waajibiyey tallaalka COVID-19 inay qaataan dhammaan shaqaalaha Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS). Intii xanuunkani faafaya ee

COVID-19 jiray, waxaan raaceyney tilmaamaha ay bixinayeen khabiirada caafimaadka dadweynaha sida ugu fiican sidii aan u hubin lahayn caafimaadka iyo fayo-qabka ardaydeena iyo xubanaha shaqaalaha. Gobolka Oregon wuxuu wargaliyey dugsiyada degmada ee deegaanka inay iyagu ku haboon yihiin ay go'aan ka gaaraan haddii ay rabaan inay qaadaan tallaabooyin dheeraad ah oo ay kaga hortagayaan faafitaanka xanuunka COVID-19. Tallaabooyinkaasi oo ah kuwa la jaanqaadaya khabiirada caafimaadka dadweynaha tallooyinka ay bixinayaan, Dugsiyada Dadweynaha Portland iyo shaqaalahayaga aan iskhaashiga leenahay inay ka go'an tahay inay qaadaan tallaabo kasta oo suurtagal ah laguna xaqiijinayo caafimaadka iyo nabadgelyada ardaydeena, shaqalaaheena, iyo bulshadeenaba.

Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan tallaalka lagu waajibiyey shaqaalaheena inay qaataan, faahfaahinta ay ka wada shaqeeyey shaqaalaheena aan iskaashiga leenahay , adiga oo gujinaya halkan.

Ugu dambeyn, waxaan rajeyneynaa inaan idinla wadaagno Su'aalaha Inta Badan La Isweydiiyo iyo Jawaabahooda(FAQ) ee Cuntada iyo Baaritaanka COVID-19 kuwaasi oo la helayo maalmaha soo socda. Intaasi waxaa dheer, Waxa aanu cubsooneysiin doonaa dhammaan Su'aalaheena Inta Badan La Isweydiiyo (FAQ) marka macuulaad dheeraad ah la helo. Waxaad jawaabaha inta badan la isweydiiyo ee su'aalaahaga ku saabsan tallaabooyinka caafimaadka iyo nabadgelyada ka heli kartaa shabakadayada **PPS.net/BacktoSchool2021**.

Waad mahadsan tihiin.

Su'aalo ? Faallooyin ?
Aynu Wada Hadalno